



**UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 30/07/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKAALAD BIXIYE:- SAID BASHIR HASSAN**,  
Hooyo: Xalwo Xasan Jimcaale, Somali ah, Ku Dhashay:  
Isiolo, Sanadkii: 01/01/1987, Sita: Kenyan passport, Lr.  
BK281142.

**LA WAKIISHE:- HALWO HASSAN JIMALE**,  
Hooyo: Xaawo Geele Kahiye, Somali ah, Ku Dhalatay:  
Galkacyo, Sanadkii: 01/01/1965, Sita: Somali Passport,  
Lr. P01394919, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo  
Jinsiyadaha Soomaliya

B- Aniga oo ah **SAID BASHIR HASSAN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Hooyadeey **HALWO HASSAN JIMALE** una wakiishay qaybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay dhamaan wax allaale iyo wixii hanti ah uu lahaa kana geeriyooday Aabaheey Marxuum **BASHIR XASAN KHEYRE**, kuna Qoran Magaciisa Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir iyo Gobolada Kale ee dalka, sida guri, dhul banaan, goof, beer, gaadiid, I.W.M. Waxaana si buuxda ugu wakiishay in ay ii Xafidi karto, dayactiri karto, Gadi karto, kireeyn karto, Wareejin karto, dhisi karto, Qareen ii Qaban karto hadii loo baahdo, Xanaaneyn karto, igu matali karto magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, iina qaadi karto Qismigeysga dhaxaleyd ee uu nasiibkeyga noqdo, iigana doodi karto maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karto waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karto kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman tahay in ay si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karto, insha'allaahu.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **HALWO HASSAN JIMALE** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Qeybta dhaxaleedkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.





T- Aniga oo ah **HALWO HASSAN JIMALE**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Wilkeyga **SAID BASHIR HASSAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA**

SAID BASHIR HASSAN

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

HALWO HASSAN JIMALE

1- OSAMA LIBAN ABDULLAHI


**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

2- NURDIN MOHAMED MOHAMUD


  
  


**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1713/T.P.N/25, Tr. 30/07/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **SAID BASHIR HASSAN** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **HALWO HASSAN JIMALE** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA  
**Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**










**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 04/08/2025**

Aniga oo ah **Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Xaawo Xasan Jimcaale** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1713/T.P.N/25, Tr. 30/07/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	Xaawo Xasan Jimcaale
<b>Nooca</b>	Wakaalad Guud
<b>Loo Wakiishay</b>	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyaha Saciid Bashir Xasan
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	30/07/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **Xaawo Xasan Jimcaale**, Leh Tel No. **0615870346**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed C/laahi Maxamed**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Xaawo Xasan Jimcaale**

*Xaawo Xasan*